



Langtids EKG reg. R-test 09-2019 Somali

DIIWAAN GELINTA EKG MUDDADA DHEER (R-TEST)

MAGAC: _____ Dhashay taariikhda: _____

Hadda waxaad heshay qalabka duubaha EKG-ga oo diiwaan gelinaya garaaca wadnahaaga muddo dhawr maalmood ah.

1. U noolow si caadi ah muddada uu kugu xiran yahay qalabka duubaya ee EKG-ga.
2. Qalabkan EKG-gu uma adkaysto biyaha. Haddii aad qubaysanaysid ama dabaalanaysid waa inaad iska furtid qalabkan EKG-ga ee duubaha ah.
3. Haddii danab-side soo fuqo, waa inaad danab-sidahaas bixisid oo dib ugu dhejisid (waxaa lagu siinayaa danab-sidayaal dheeraad ah).
4. Haddii aad dareentid dhibaato sida laab-xanuun, wareer ama wadnegariir, waxaad riixaysaa badhanka weyn ee bartamaha kaga yaal qalabka duubaha ah. Markaas ayaa qalabka duubaha EKG-gu diiwaan gelinaya inay dhibi kugu dhacday.
5. Ku qor intay saacaddu tahay iyo nooca dhibta ee kugu dhacday warqaddaan.
6. Haddii aad jir-dhis samaysid, ku hoos qor taariikhda iyo saacadda khaanadda «waxyabo kale» ee foomka.

Ballan baad ku leedahay rugta caafimaadka, qaybta daaweynta si aad isaga furtid qalabka EKG-ga ee duubaha ah iyo inaad keentid warqaddaan:

_____ Saacadda _____

U dhiib warqaddaan kalkaalisada caafimaadka. Kadib dhakhtarka ayaa qiimayn doona qoraalkaaga iyo diiwaan gelinta qalabka EKG-ga ee duubaha ah.

Natiijada baarista waxaa loo diri doonaa dhakhtarkii baarista kuu soo diray.

Nasiib wacan iyo soo noqod wanaagsan!

Taariikh	Saacad	Laab-xanuun Isku-tillaab saar X	Wareer Isku-tillaab saar X	Wadnegariir Isku-tillaab saar X	Waxyabo kale

